

# Maxkamadda Degmada King

Dhismaha Maxkamadda Degmada King waa uu adeegu ku dhan yahay oo u adeegta waqooyiga iyo bariga Degmada King. Waxa ay ku taalaa Wadada Sadexaad ee faras magaalaha Seattle inta u dhaxeysa James iyo Yesler.

## **Cinwaanka Dhismaha:**

516 Third Avenue  
Seattle, WA 98104

## **Cinwaanka warqadaha loogu diro:**

King County Superior Court  
516 Third Avenue, Room C-203  
Seattle, WA 98104

## **Maalmaha Iyo Saacadaha Shaqada:**

Isniin-Jimcaha, 8:30 aroornimo-4:30 galabnimo.



- [Fasaxyada Iyo Maalmaha Aanay Maxkamaddu Shaqeyneyn](#)

## **Sidee Lagu Tagaa Halkaas [KHARIIDAD](#)**

- [Khadka Baska](#) (Mareegta Khadka Basaska ee Degmada King.)
- [In Aad Raacdo Tareenka](#) (mareegta Bogga tareenka Sound Transit.)
- [Gaari aad wadato](#) (Mareegta Google Maps.)
- [Macluumaadka Goobaha Gaadiidka La Dhigto](#)
- [Goobaha la dhigto Bushkuleetiya](#)
- Halkan kala soo dag [Khariidadda](#) iyo [Warside](#) ka hadlaya Maxkamadda Sare ee Degmada King, Maxkamadda Degmada King, Iyo Maxkamadaha Madaniga ee faras magaalaha Seattle.

[Warsidahan](#) waxa uu faahfaahinayaa sida looga codsado adeegyada maxkamadda ee Dhismaha Maxkamadda Ee Degmada King.

## **Fududeynta Loo Fidiyo Dadka Naafada Ah**

Haddii aad nafo tahay, fadlan buuxi foomka [Codsiga U Fududeynta](#) . Faahfaahinta sida loo buuxiyo ayaa la socota.

Dadka naafada ah intooda badan qof ayaa keena dhismaha oo ku dajiya isgoyska Wadada Sadexaad. Goobaha ay dhigtaan dadka naafada ah waxaa laga heli karaa Garaashka Goat Hill ee Gaadiidka La Dhigto (415 Wadada 6aad) Meelo u gaar ah dadka naafada ah (ADA) ayaa ku yaal dabaq kasta marka laga reebo dabaqa 4 iyo 9. Ka bax Wadada 5aad, ka gudub 5aad, horey u soco lootada 500 kana soo gal Dhismaha Maamulka Degmada King. Wiishka u raac dabaqa ugu hooseeya (ee lagu

calaamadeeyey “T” ee wiishka) oo maxkamadda ka soo gal wadada dhulka hoostiisa marta.

### **Baaritaanka Gelidda Maxkamadda**

Maxkamadda waxa ay leedahay goob dadka lagu baaro. Alaabadana [lama ogola in lala galo Dhismayaasha Maxkamadaha King County](#). Ka daawo halkan [fiidiyoow](#) faahfaahinaya baaritaanka amaanka ee la xiriira gelitaanka dhismaha maxkamadda.

### **Goobta Caruurta Lagu Hayo**

Dhismaha Maxkamadda Degmada King ma laha goob caruurta lagu hayo.

### **Cuntada**

Dukaanka laga gato cuntada fudud ayaa ku yaal dabaqa 1aad. Makiinadaha cuntada fudud laga iibsado ayaa ku yaala dabaqa 1aad ee qolka xeer beegtida.

**Xog dheeraad ah ka baro:** [Taariikhda Maxkamadda Degmada King](#).